A Message from

The Professional Development Team

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Ku soo Dhawaw, Xagaaga!

Wargeyska sadex biloodlaha ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxaa loogu talo geley dadka la shaqeeya caruurta, dhalinyarta iyo qoysaska Washington si loogu sheego shaqada wanaagsan ee Hormarka Xirfadeed.

Wargayskan waxaa ku jira...

- Bushqada Bixiyaha COVID-19
- Saacadaha Kaydka la Bedeley - Laga Bilaabo Julaay 1
- Laba Luuqadood Waxbarashada Hore
- Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Shaqada Labada Luuqadood ee DCYF
- Macluumaad Xiiso Badan oo Ku Saabsan Labada Luuqadood
- Websaystka U Qalanka Cusub Ayaa Iminka La Heleyaa
- Koonaha Tobobarka
- Khayraadka Caruurta Da'da Dugsiga Ayaa Iminka La Heleyaa
- Tobobarayaasha iyo Barnaamijka Tobobarka Gobolku Ansixiyay
- Beeraha Washington ee Dalada Dugsiga
- Taxanaha Webinaarka Xagaaga
- Agoosto: Laba Luuqadood Waxbarashada Hore
- Sebtambar: Tijaabada Shaashadda Cusub ee MERIT!
- Ka Maqnaa Webinarka Julaay: Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Tobobarka Bulshada Ku Salaysan?
- Ku Taageerida Shaqaalaha ECE Waxbarashada
- Deeqda Waxbarasho ee Early Achievers: Sheekooyinka Guusha
- Wada Shaqaynta Bulshada ee DCYF
- Macluumaadka Ugu Danbeeyay ee Qabaa'ilka
- Calaamadayso Bogga webka ee Hormarka Xirfadeed

- Isku Duwaan Geli Wargeysyada PD
- Fariin ka Socota Xoghayaha DCYF
- Sideenu Nahay?

Bushqada Bixiyaha COVID-19

Sanadkan intii hore, DCYF waxay isticmaashay Kaalmada, Samogalka iyo Sugnaanta Dhaqaalaha ee Coronavirus CARES (Coronavirus Aid, Relief, and Economic Security) Sharciga ah oo lagu maalgeliyo samaynta iyo qaybinta agabka fasalka ee bixiyayaasha waxbarashada hore.

Waa ku mahadsan yihiin xafiisyada Ogaanshaha Daryeelka Ilmaha deegaanku gacanta ay ka gaysteen u qaybinta agabka dhamaan Washington. Waxa aad ka gaysatay **gacan** wayn!

Codso Bushqad

Hadii aanad helin bushqada COVID-19, fadlan buuxi xog uruurintan si markaa aanu kuula soo xidhiidhi karno. DCYF waxa ay ka shaqaynaysaa sidii ay uga saari lahayn, laakiin waxa ay qaadan kartaa mudo isku dubo ridka taasi. Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga.

Codso Bushqad

Saacadaha Kaydka la Bedeley - Laga Bilaabo Julaay 1

Bixiyayaasha Xarunta Daryeelka Carruurta

Laga bilaabo Julaay 1, bixiyayaasha xarumaha daryeelka ilmaha liisanka haysta ee ku jira Early Achievers waxay heli doontaa wakhti badal oo lacag lagu qaato, ilaa shan maalmood (50 saacadood). Saacadaha waxaa loo qaybiyaa sida loosoo kala horeeyo, oo waxaana ay ku eeg yihiin ilaa inta lacagtu dhamaanayso.

Bixiyayaasha xarumaha daryeelka ilmaha liisanka haysta ee aan ku jirin Early Achievers waxay heli karaan Daryeelka Hore ee Gobolka iyo Kaydka Badalka Waxbarashada oo ay iskood iskaga bixiyaan lacagta iyagoo u maraya ikhtiyaarka mushaharka gaarka ah. Guji halkan si aad u akhrido macluumaadka ugu danbeeya (oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, iyo Soomaali).

Bixiyayaasha Daryeelka Carruurta ee Qoyska

Bixiyayaasha Daryeelka Carruurta ee Qoyska Guriga Liisanka Haysta ee Qaata Kaabista Gobolka: Laga bilaabo Julaay 1, dhamaan bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee guriga qoyska liisanka haysta ee u shaqeeya ilmaha qaadanayey kaabista gobolka 12 bilood ee lasoo dhaafay gudahood wakhtiga la

samaynayo jadwalka badalka, waxa ay heli doonaan shan maalmood (50 saacadood) oo wakhti badal oo lacag lagu bixiyo sanad xisaabeedkiiba (Julaay 1, 2021 - Juun 30, 2022).

Bixiyayaasha Daryeelka Caruurta ee Qoyska Guriga Liisanka Haysta ee Aan Qaadan Kaabista Gobolka- : Laga bilaabo Julaay 1, dhamaan bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee guriga qoyska liisanka haysta ee ku jira Early Achievers oo aan u shaqaynin ilmaha qaadanayey kaabista gobolka 12 ee lasoo dhaafay gadahood waxay heli doonaan wakhti badal lacagta la bixinayo, ilaa shan maalmood (50 saacadood). Saacadaha waxaa loo qaybiyaa sida loosoo kala horeeyo, oo waxaana ay ku eeg yihiin ilaa inta lacagtu dhamaanayso.

Bixiyayaasha daryeelka ilmaha liisanka haysta ee aan qaadan kaabista gobolka ama ku jirin Early Achievers waxay heli karaan Daryeelka Hore ee Gobolka iyo Kaydka Badalka Waxbarashada oo ay iskood kharashka iskaga bixiyaan iyagoo u maraya ikhtiyaarka mushaharka ee gaark ah. Guji halkan si aad u akhrido macluumaadka ugu danbeeya (oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, iyo Soomaali).

Xidhiidhka

Wixii su'aalo ah, iimeel ugu dir Maamulka Kaydka Badalka Gobolka, The Imagine Institute, subpool@imaginewa.org ama la hadal 206-492-5249.

Laba Luuqadood Waxbarashada Hore

Labada Luuqadood (Dual Languagen, DL) Dhawr Luuqadood (Multilingual, ML) waxbarashada ah waxaa weeye nooc waxbarasho oo ardayda loogu dhigo wax akhriska/qorista, dhaqanka, iyo casharrada laba ama wax ka badan oo luuqadood. Taageerada laba luuqadood ah waxaa barigii hore hagi jiray House Bill 1445 kaas oo iminka ahRCW 43.216.105.

Waxyar kadib markii House Bill 1445 la ansixiyey 2017, DCYF oo waxay abuureen tobobarka Ardayda Labada Luuqadood (Dual Language Learners, DLL) oo iska kaashadeen bulshada iyo Hay'ada Jaamacada Washington ee Waxbarashada iyo Sayniska Maskaxda (I-LABS).

Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Shaqada Labada Luuqadood ee DCYF

Hogaanka Luuqadaha Badan ee DCYF. Soo Dhawaw, Athena!

Kooxda Hormarka Xirfadeed waxaa farxad u ah inay ku soo dhawayso Athena Jiménez-Manalo inay hogaamiso dadaalka hormarinta shaqaalaha waxbarashada hore oo diirada lagu saarayo dadka la shaqeeya caruurta ah ardayda labada luuqadood.

Waxaa kamid ah masuuliyada Athena inay kala shaqayso hay'adaha gobolka iyo bulshada curinta iyo u hogaansanka siyaasadaha iyo nidaamyada, curinta manhajka iyo bixinta, u diyaarinta shaqaalaha baahiyaha la xidhiidha DLL.

Macluumaadka Ugu Danbeeya oo Dheeraad ah

- Tobobarka DLL waxaa lagu bixiyay Zoom-ka inta u dhaxaysa Janaayo ilaa Juun 2021, oo waxaana ay sii socon doontaa mustaqbalka

- Kaqaybqaate tobobar oo kastaa wuxuu helaa bushqad ay weheliyaan agabka fasalka si loo taageero luuqada iyo dhaqanka
- Tobobarka onleynka ah ayaa la wadaa oo waxaa uu diyaar noqon doonaa dhawaan
- Tobobarka labada luuqadood ee qabiileed oo la habeeyey wali waa la wadaa iyada oo la iskaashanayo Waxbarashada Hore ee Siyaasada Hindida ee DCYF (DCYF's Indian Policy Early Learnin, IPEL)
- Ikhtiyaarada bushqada labada luuqadood oo la kordhiyay si ay uga muuqato luuqado iyo dhaqano badan

Maxay Tahay Inaad Ka Ogaato In Badan? La soco Webinaarka Labada Luuqadood ee Agoosto!

Macluumaad Xiiso Badan oo Ku Saabsan Labada Luuqadood

- DLL iyo ML waxaa loo isticmaalaa si joogto ah oo la isku badalo si loo sharaxo ardayda ayna luuqadooda kowaad ahayn Ingiriisi. Erayga 'Luuqado badan' waa mid koobsanaya dhamaan ardayda ku hadla laba ama wax ka badan oo luuqadood oo aan Ingiriisi ahayn.
- ML waxay leeyihiin maskax furfuran oo mar kasta ka shaqaynaysa laba ama wax ka badan oo luuqadood oo samaysa xidhiidhin dhaqanka iyo luuqadaha ah.
- **Khuraafaad**: DLL waa ku gaabis barashada luuqada marka loo eego caruurta kaliya barata halka luuqad.
- **Xaqiiqo**: Cilmi baadhayaashu waxay noo sheegaan in barashada luuqadaha ka badan hal inayna sinaba u yaraynin barashada luuqada.
- **Khuraafaad**: in caruurta la baro luuqado badan waxay keeni kartaa in dib u dhac uu ku yimaado hadalkooda ama hormarka luuqada iyo/ama ay timaado in ilmuhu uu dawakho.
- **Xaqiiqo**: Xataa hadii ay daahdo barashada luuqada ilmuhu, in lagu daro luuqad kale ma keeneyso inuu ilmuhu dawakho ama in barashadiisa luuqad dib u sii dhacdo.
- **Xaqiiqo**: dadka yaqaana luuqadaha badan waxay si dhakhso ah oo sax ah ugu kala wareegaan shaqooyinka, wax u fiirsadaan, oo ay shucuurta u xakameeyaan.

Websaystka U Qalanka Cusub Ayaa Iminka La Heleyaa

Kadib bilo dhan oo shaqo iyo dhaqan gelin ah fikiradaha laga heley bulshada, websaytka cusub ee Shuruudaha Aqoonta iyo Kaalinta waa la diyaariyay!

Dadaalka Wada Shaqaynta Bulshada

Ilaa 2019, waxyar kadib WAC-ta Aqoonta Shaqaalaha markay dhaqan gashay, kooxda PD waxay dhagaysteen fikirad muhiim ah si ay si dhaanta ugu siiyaan oo ay ugu sharaxaan aqoonta shaqaalaha bixiyayaasha. Websayt ayaa hore loo abuuray oo waxa la soo galay khayraad kooban laakiin macluumaadka ugu danbeeya ee dheeraadka ah ee WAC ayaa ka dhigay macluumaadka mid baaxad wayn, shaqada ayaa u baahatay meel lagu noolaado.

Bishii Maay ee sanadkan, kooxda PD waxay qabteen webinar, *Muuqaal Guud oo Cusub (Sneak Peek of the New)*
Websaytyada Aqoonta Shaqaalaha, oo u raadiyey fikir hore qabyo qoraalka websaytka, kadibna bilaabay inuu sameeyo todoba tijaabo oo shakhsi ahaaneed si loo raadiyo fikir dheeraad ah oo ku saabsan macluumaadka, socodka iyo luuqada.

Waad Mahadsantahay!

Mahadnaq wayn ayaan u haynaa qof kasta oo naga caawiyay talooyinka websaytyada cusub, shaqadani may qabsoonteen la'aantiin! Way ku mahadsan yihiin dadka soo socdaa wakhtiga iyo daalkooda:

- Reinette A. Khayraadka Daryeelka Ilmaha
- Brenna L. Dugsiga Goddard ee Korniinka Caruurnimada Hore
- Jennifer M. ee the Woodland Hall Preschool
- Heather C. ee Green Lake Preschool
- Kayli T. ee ESD 112
- Maria R. oo ka socda Kooxda Liisamada DCYF
- Mariela L. oo ka socda Kooxda Liisamada DCYF
- Debbie D., DCYF's Webmaster
- Emily B. oo ka socda Kooxda Xidhiidhka DCYF
- Diana S. & Erin S. oo ka socda Kooxda PD
- Qof kasta oo ka qayb geley webinarkeena oo sii wada bixinta fikirka. Waanu kuu mahadnaqaynaa adiga iyo waxa aad tidhiba

Ka Eeg

Fadlan ogow: tani maaha dadaal hal mar lagu dhamaynayo. Hadii aad qabto wax su'aalo ah, talooyin, ama wax aad u baahan tahay in laguu bayaamiyo, la xidhiidh Marlene White.

Koonaha Tobobarka

Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Tobobarka Waxaa Kamid ah:

- Tobobarka U Dhigma ee DCYF Ansixisay
- Khayraadka Da'da Waxbarashada
- Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta (Child Care Basics, CCB)
- Kor U Qaadida Tayada Waxbarashada Hore (Enhancing Quality Early Learning, EQEL)

Tobobarka U Dhigma Kay Ansixisay DCYF: Tobobarka Bulshada Ku Salaysan

DCYF waxaa farxad u ah inay bayaamiso tijaabada tobobarka bulshada ku salaysan inuu dhammaaday oo aananu wax ka baranayo kaqaybqaatayaasha. Waxa aad ka eegtaa dhabarka Websaytka Tobobarka Bulshada Ku Salaysan si aad u aragto fikirada tijaabada. Iminka maadaama oo tan la dhameeyay, DCYF waxay kala shaqaynaysaa Cultivate Learning in lagu daro fikirka qaabka waxbarasho si loo hormariyo barnaamijka dhaqan gelintiisa gobolka oo dhan.

DCYF waxay qabatay webinaar Julaay ay kaga waramaysay shaqadan. Hadii aad kusoo biiri kari wayday, waxa aad ka daawan kartaa isagoo duuban halkan. DCYF waxay kala shaqayn doontaa Cultivate Learning si loo dhexgeliyo fikirkan qaabka tobobarka oo loogu hormariyo barnaamijyada si gobolka oo dhan looga dhaqan geliyo.

Inta la wado naqdinta, DCYF waxa ay kala shaqaynaysaa SBCTC samaynta nidaamka lagu heleyo dhibcaha kuuliyada ee tobobarka socda. Macluumaad dheeraad ah ayaa la heli doonaa horaanta 2022 oo ku saabsan shaqadan.

Booqo websaytka si aad ula socoto ikhtiyaaradan u dhigma ee bixiyayaasha waxbarashada hore ee liisanka haysta ee loo baahan yahay in la bilaabo ama shahaado gaaban oo kaalintooda ah. Wixii su'aalo ah, waxa aad la xidhiidhaa Diana Stokes.

Maxaan Ka Filan Karaa CCB Oline-ka DCYF?

CCB onleynka ah waxaa laga heli karaa websaytka tobobarka onleynka ah ee DCYF. CCB-gan onleynka ah waxaa lagu siiyaa bixiyayaasha bilaash. Inta ay DCYF wado yaraynta bixinta CCB onleynka ah, kooxo tobobaro dheeraad ah ayaa la sii wadi doonaa in lagu daro MERIT.

Tobobarkani waxaa lagu qaataa qaab haleelkaaga ku xidhan mudo 30 maalmood ah. Inta lagu jiro mudadan, waxa aad:

- Akhrin doontaa macluumaadka
- Ka jawaabi doontaa tilmaamaha laga wada hadlay ee tobobaruhu uu naqdinayo
- La shaqayn doontaa kaqaybqaatayaasha kale casharka ugu danbeeya

Isticmaal taabka "Find Training (Hel Tobobar)" ee duwaan gelinta shaqaalaha, MERIT, si aad u aragto ikhtiyaarada jira.

Si aad u hesho DCYF CCB, baadh "Child Care Basics (Aasaasiyaadka Daryeelka Ilmaha)" oo waxa aad eegtaa tobobarada la heli karo ee hoos yimaada "online." Halkaas, waxa aad ka heleysaa sida la isku duwaan geliyo tobobarka iyo tobobarayaasha la xidhiidha. **Ogow:** *Tan lagama arki doono xisaabtaada tobobarka onleynka ah ee DCYF ilaa inta tobobaruhu uu ka dhamaystirayo nidaamka duwaan gelinta dhiniciisa.*

Ikhtiyaaro dheeraad ah oo dhamaystirka tobobarka CCB ah, oo ay ku jiraan ikhtiyaaro kale oo kumeel gaadhka ah oo ay keentay COVID-19, ayaa weli la heli karaa.

Kor U Qaadida Tayada Waxbarashada Hore (Enhancing Quality Early Learning, EQEL)

Sanadka 2 ee EQEL ayaa soo dhaw! Hadii aad dhamaysatay sanadka 1, waxa aad heli doontaa sanadka 2 oo lagu bixinayo MERIT wakhtiga dayrta. Ma doonaysaa inaad ku dhamaystiro EQEL onleyn? Waxa aanu iminka ku diyaarinaa tan websaytka tobobarka onleynka ah ee DCYF - waxa aad la socotaa fursada jirta laga bilaabo dayrta.

Xasuusin, marka aad dhamaysato CCB, talaabada xigta waxaa la dhamaystirayaa EQEL taas oo qayb ka ah saacadahaaga adeega - waxa aad hoos ka arki kartaa wixii dheeraad ah:



Khayraadka Caruurta Da'da Dugsiga Ayaa Iminka La Heleyaa

WAC 110-301 wixii bixiyayaasha da'da waxbarasho ee liisanka haysta waxa ay bilaabantay Juun 1, 2021. Xaga danbe, DCYF waxa ay ku mashquulsanayd in la isku keeno khayraadka shuruudaha cusub ee Hormarinta Xirfadaha si sameeyo. Khayraadkan iminka waxaa laga heleyaa websaytka Aqoonta Shaqaalaha ee cusub ee bixiyayaasha Da'da Waxbarashada. Websaytkan, waxa aad ka heleysaa khayraadka sida:

- Shaxda Guud ee Aqoonta Shaqaalaha
- Shaxda Shuruudaha Tobobarka
- Ikhtiyaarada U Dhigma
- Iyo wax kale oo badan!

Tobobarayaasha iyo Barnaamijka Tobobarka Gobolku Ansixiyay

Ma doonaysaa inaad wax ka ogaato waxa ka socda caalamka Tobobarka Gobolku Ansixiyay? Korniinka ugu danbeeya ee Wargayska Shaqaalaha waxa ku qoran mawduucyada soo socda:

- Naqdinta heerarka tobobaraha
- Kormeerka tobobaraha gobolku ansixiyay ee mustaqbalka
- Tobobarayaasha lagu taageerayo taxanaha webinarka cusub

Liiska dhamaystiran ee Korniinka Wargeyska Shaqaalaha waxa laga heli karaa websaytka Wargayska iyo Webinaarka DCYF.

Beeraha Washington ee Dalada Dugsiga

Baaqa Bulshada Xirfadlayda ee beerta Daryeelka Hore iyo Waxbarashada (Farm to Early Care and Education, ECE) - Wax ka baro lodkaa!

Ku biir baaqa beerta Bulshada Xirfadlayda ECE ee xigta ee **Julaay 27 inta u dhaxaysa 3-4 galabnimo** si aad u maqasho warkooda horyaalada Gobolka Washington oo dhan ee sida ay u dhiseen uguna beereen beer barnaamijyada ECE ee bulshadooda. Khudbad jeediyayaaasha waxa ay matalayaan saddex beerood oo cusub oo sheekooyinka guusha ee ECE ah ee dhawaan onleynka lagu baahiyay. Waxaa sidoo kale jira wakhti kaqaybqaatayaashu ay su'aalo ku waydiin karaan una wadaagi karaan sheekooyinka iyo macluumaadka ugu danbeeya ee ku saabsan shaqooyinkooda. Riix halkan si aad isku duwaan geliso.

Tobobarka CUSUB ee Beerta Daryeelka iyo Waxbarashada Hore (Early Care and Education, ECE): Maskaxda Koraysa iyo Abiteedka Caafimaadka Qaba

Dariskan hormarka mihnada ee cusub ee bilaashka ah ee onleynka ah waxaa qabanaysa Nourished and Active in Early Learning ee Jaamacada Washington. Waxa aad wax ka barataa sadexda qaybood ee Beeraha ECE ee sida qotoda dheer loogu eegayo waxbarashada tijaabada ah, sida loogu dabbaqo beerta ECE CACFP, iyo sida loola shaqaynayo waxbarashada hore ee bulshadaada. Tobobarku wuxuu bixiyaa dhibco 2 XIDDIGOOD AH.

Taxanaha Webinaarka Xagaaga

Taxanaha Webinaarka Xagaaga waxaa diirada lagu saarayaa Tobobarka Bulshada Ku Salaysan, Waxbarashada Hore ee Labada Luuqadood, iyo tijaabada shaashada MERIT ee cusub. Faahfaahinta buuxda waxay ku qoran tahay hoos.

Agoosto: Laba Luuqadood Waxbarashada Hore

Labada luuqadood/dhawr luuqadood waxbarashada ah waxaa weeye nooc waxbarasho oo ardayda loogu dhigo wax akhriska/qorista, dhaqanka iyo casharka laba ama wax ka badan oo luuqadood.

Waxa aad ka qayb gashaa webinaarkan si aad wax uga barato kooxda PD ee samaynaya hormarinta shaqaalaha waxbarashada hore ee diirada lagu saarayo cida la shaqaynayso caruurta luuqadaha badan baranaya. Waxa aanu ka hadli mawduucyada soo socda iyaga oo faahfaahsan:

- Macluumaadka ugu danbeeya House Bill 1445 ee ku saabsan labada luuqadood (iminka uu hago RCW 43.216.105)
- Labada Luuqadood iyo Dhawrka Luuqadood
- RCW & Bilaw Cadaalad ah ee Adeeg-bixinta Xeerka Caruurta
- Dadaalka wada shaqaynta PD iyo talaabooyinka xiga ee shaqadan

Talaatada, Agoosto 17 | 6 galabnimo.

Halkan Iska Duwaan geli

Sebtambar: Tijaabada Shaashadda Cusub ee MERIT!

Shaashada MERIT ee xirfadlayaasha waxbarashada hore ee liisanka haysta waxa lagu samaynayaa wax ka badal.

Shaashada cusub waxa ay u ogolaanaysaa dadka inay si fudud ula socdaan aqoonta iyo khibradda iyo heerka hormarka xirfadeed oo waxaa loo fadhiyaa in la heli karo dayrta.

Inta lagu jiro webinaarkan, kooxda PD waxay:

- Tijaabin shaashada cusub
- Jibaaxi oo muujin sida loola socdo heerka khibrada

Talaatada, Sebtambar 21 | 6 galabnimo

Halkan Iska Duwaan geli

Ka Maqnaa Webinarka Julaay: Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Tobobarka Bulshada Ku Salaysan?

Webinaarada mar kasta waa la duubaa oo waxaana la geliyaa bogga Wargeysyada iyo Webinaarada.

Hadii aad waydo webinaarka aad doon doonayso, waxa ay u badan tahay in aanu ka shaqaynayso duubitaanka iyo gelinta. Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga. Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan webinaar gaar ah, iimeel u dir Marlene White.

Ku Taageerida Shaqaalaha ECE Waxbarashada

DCYF way taqaanaa qiimaha waxbarashada oo waxay ka shaqaysaa iyada oo ku qanacsan sidii ay uga wada shaqayn lahaayeen bulshada waxbarashada sare sidii loo nashqadayn lahaa oo loo bixin lagaa barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan iyo deeqo waxbarasho oo lagu taageerayo shaqaalaha waxbarashada hore. Si aad ula socoto barnaamijyadan iyo khayraadka waxbarashada ee kale, booqo

Deeqaha waxbarashada, Gunooyinka, iyo Abaalmarinta

Deeqda Lacagta Early Achievers & Deeqda Waxbarashada ee Kale

DCYF waxay siisaa deeqo waxbarasho oo waxbarashada hore ah kuwa u shaqeeya barnaamijka ku jira Early Achievers. Waxa aad eegtaa ikhtiyaarada aad heli karto:

Deeqdaha Waxbarashada Early Achievers

Deeqda Waxbarasho ee Early Achievers: Sheekooyinka Guusha

Sheekada Supraja

Magacaygu waa Supraja P. oo waxa aan ku leedahay xarun daryeelka ilmaha maalintii gurigayga. Waxa aan ka qayb geley barnaamijyada Early Achievers ee xagaaga 2019 oo wax wayn ayuu ka taray hormarka mihnadayda. Waxa aanu ka helnaa aqoon iyo taageero badan xirfadlayaasha. Buugaagta daabacan iyo kharashka waxbarashada ee

la iga bixiyaa waxay iga caawiyaan inaan dhamaysto dariskayga waxayna iga caawisay inaan siiyo caruurta waxbarasho tayo wanaagsan iyo habdhiseed deegaan waxbarasho oo tayo sareeya. Waxay iga caawisay inaan fahmo sida looga caawiyo caruurta waxbarashadooda oo waxa aan hormariyay farsamadayda wax dhigista. Waad ku mahadsan tahay caawimaadaada.

Sheekada Genesis

Kahor inta aanan bilaabin kuuliyada, waxa aan go'aansan waayay waxa aan ka dhigayo mihnadayda. Shayga kaliya ee aan doonayay waxa uu ahaa mihnad caruurta aan kula shaqeeyo. Waxa aan ka bilaabay shaqo oo aan iminka ka shaqeeyaa La Petite Academy (LPA) oo ku yaal Kirkland. LPA waxa uu fursad wanaagsan ii siiyay inaan in badan koriyo mihnadayda oo waxa uu iga caawiyay Deeqda Lacagta Early Achievers. Waxa aan bilaabay gugii 2019 Lake Washington Tech oo waxa aan ka qalin jabinayaa jiilaalka 2021. Ilaa markii aan bilaabay, xaruntu waxa ay iga taageertay waxbarashadayda oo dhan. Kahor inta aanan bilaabin, waxa aan lahaa waxoogaa aqoon ah oo ku saabsan korniinka ilmaha laakiin may ahayn inta aan iminka leeyahay.

Intii aan waday barnaamijka ECE ee sadex biloodlaha ah, waxa aan ku bartay wax badan. Laga bilaabo daryeelka ilmaha sabiga ah ilaa daryeelka caruurta da'da waxbarashada gashay, barnaamijkan waxa uu si dhab ah u saameeyay waxbarashadayda iyo aragtidayda mihnadan. Markii aan waxbartay, waxa dhacday inaan xidhiidh xoogan la yeesho qoysaska, caruurta, iyo shaqaalaha aanu wada shaqayno. Waxa aan si dhaanta sidii hore ula xidhiidhaa qoyska aniga oo kala sheekeysta hawlaha maalintii ee ilmahooda, oo ka caawiya baahiyahooda, cusboonaysiinta manhajka, iwm. Sidii aan sheegay, waxaan la joogay LPA ilaa intii aad bilaabay waxbarashada. Waxa ay igu cariyeen in aan dadaal badan geliyo fasalkayga. Agaasimahayga, kaaliyaha agaasimaha, iyo shaqaalaha aanu wada shaqayno waxay ku arkaan korniin wayn awoodahayga.

Deeqdan waxa ay muhiim u tahay aniga iyo qoyskayga. Walaalahay umay helin furad deeq lacageed oo kuuliyada ah. Labadayda waalidba waxaa weeye soo geleyti oo markii aan helnay deeqdan, waxa aan noqday qofkii kowaad ee qoyskayga ka tirsan ee ka qalin jabiya kuuliyad. Sidoo kale, deeqdani waxay fursad ii siisay inaan qabto shaqo aan jecelahay. Waxa aan ku dadaalaa waxa aan doonayo noloshayda oo tanina waa mid kamid ah. Waxa aan aad uga mahadnaqay deeqdan. Hadii aanan heli lahayn deeqdan, fursad uma heleen aan ku galo kuuliyada.

Sheekada Monika

Deeqda Early Achievers waxay iga caawisay in aan qaato duruusta kuuliyadda ee ECE oo aan ku xidhmo la taliyayaal, hormariyo shakhsiyadayda, iyo agab tobobar. Waxay tani iga caawisay inaad koro shakhsi ahaan iyo xirfad ahaanba oo waxa aan bilaabay inaan dhiso xirfadahayga iyo qaayaha aan ku gaarayo heerkayga ugu sareeya. Waxa aan dareemaa in diirad-saarkaygu sare u kacay oo aan ka shaqayn karo caqabada aniga oo isku kalsoon.

Macalin ahaan, waa masuuliyad i saaran in aan siiyo waxbarasho dhaanka caruurta, oo marka aan ka helo jawaabcelin wanaagsan waalidkooda, waxaan is ogaadaa inaan si sax ah wax u wado. Waxa aan ka caawiyaa caruurta inay hormariyaan aqoontooda iyo xirfadahooda. Waxa aan dareemaa farxad marka aan arko caruur ka baratay xirfado waxa aan anigu barayo. Igamay caawin oo kaliya xirfadayda, laakiin sidoo kale waxay iga caawisay inaan koriyo caruurtayda. Waxa aan u arkaa in cidii doonaysa inay aqoon dheeraad ah hesho oo doonaysa inay mihnadan ku biirto oo wax barato inay tahay inay ku xidhanto deeqda Early Achievers. Waad mahadsantahay.

Nala Wadaag!

Miyaad heshey deeqda lacagta Early Achievers oo ma doonaysaa inaad nala wadaagto sheekadaada? Waxa aad u dirtaa sheekadaada Khabiirka Waxbarashada ECE, Sharene Leek, si loogu daabaco wargeyska xiga.

Wada Shaqaynta Bulshada ee DCYF

Kooxda Wada Shaqaynta Bulshada DCYF waxay bixisaa kormeer iyo taageero la shaqaynta dadka kale ee danuhu kaga jiraan iyo hay'adaha la-talinta si loo xaqiijiyo inay jiraan xidhiidh joogto ah oo wax ku ool ah oo u dhaxeeya waaxaha iyo hay'ada.

Ka Qayb Gal!

DCYF waxay haysaa fursado badan oo ay ku xaqiijinayso in codkaaga la maqlo. Qaar kamid ahi waa:

- Gudida La-talinta Waxbarashada Hore
- Gudi Hoosaadka Taageerada Bixiyayaasha
- Kooxda La-talinta Waalidka
- Tijaabada Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Banaanka
- Iyo wax kale oo badan!

Wixii ah liiska dhamaystiran ee gudida la talinta iyo golayaasha ama inaad ku biirto, booqo Websaytka Wada Shaqaynta Bulshada DCYF.

Macluumaadka Ugu Danbeeyay ee Qabaa'ilka

Miyaad Ogtahay in DCYF ay leedahay Xafiis Xidhiidhada Qabiileed ah?

- Akhri wargeyskooda ugu danbeeya

DCYF waxay bixisaa mawduucyo la isku duwaan gelin karo oo kala duwan. Eeg liiska buuxa ee mawduucyada la isku duwaan gelin karo.

Calaamadayso Bogga webka ee Hormarka Xirfadeed

Yaanay ku dhaafin macluumaadka ugu danbeeya ee la xidhiidha tobobarka iyo Hormarka Xirfadeed. Calaamadayso Bogga Hormarka Xirfada!

Calaamadayso Bogga PD

Isku Duwaan Geli Wargeysyada PD

Korinta Shaqaalaha waxaa weeye khayraad loogu talo geley shakhsi kasta oo ka shaqeeya bixinta taageerada waxbarashada xirfadeed ee shaqaalaha waxbarashada hore.

Wargeyska PD waxaa loogu talo geley inuu la socodsiiyo bulshada waxbarashada hore ee Washington dhamaan shaqada wanaagsan ee ay ka qabteen Hormarka Xirfadeed.

Isku duwaan geli

Liiska dhamayska tiran ee wargeysyada waxaa laga heli karaa websaytka Wargeysyada iyo Wabinaarada.

Fariin ka Socota Xoghayaha DCYF

Xoghayaha DCYF Ross Hunter waxa uu baahiyaa fariin bile ah si uu macluumaadka ugu danbeeyay iyo wararka uga bixiyo shaqada hay'ada. Ka akhri fariintiisa ugu danbaysay hoos oo guji halkan si aad iskugu duwaan geliso.

- Wargayska Meey
- Wargayska Juun
- Wargayska Julaay

Hadii aad qabto wax su'aalo ah ama faalooyin, fadlan la xidhiidh Xafiiska Xidhiidhka DCYF.

Sideenu Nahay?

Fadlan noo sheeg sida aanu wax u wadno adiga oo galaya xog uruurintan sadexda su'aalood ah.

Hadii aad qabto su'aalo ama aad hayso mawduuc laga hadli karo la xidhiidh Marlene White.